

SANDUUQA BUUNDADA SAINT PAUL

Gargaar Degdegga oo Ka-jawaabaysa Saamaynta Dhaqaale ee COVID-19

Sida bulshooyinka kale ee qarankeena, Magaalada Saint Paul waxay ugu jawaabaysa aafada COVID-19 coronavirus si waafaqsan hagitaanka saraakiisheena caafimaadka dadweynaha. Iyada oo dhammteen aan la qabsanayno xaalddan isbeddelka degdegga ah wadata, waxaan haysanaa xil aan ku huninayno maaha keliya caafimaadka iyo badqabka degganayaasheena laakiin ah masuuliyad ah hubinta lagu xaqiijinayo in aan dhammaanteen ka helno nafis saamaynta dhaqaale ee aafadan. Sanduuqa Buundada Saint Paul wuxu gargaar degdegga siin doonaa ganacsatada yaryar ee bulshadeena ee aad ugu baahan.

QOYSASKA

\$1 MILYAN

Sanduuqa Buundada Saint Paul ee Qoysaska waxay siin doontaa qoysaska \$1,000 oo ah taageero toos ah ee kirada ama bixinta daynta guryaha. Qoysaska uqlma waxay:

- Haystaan dakhli ah ama ka-hooseeya 40% Dakhliga Dhexdehaadka ah ee Jiidda, oo ah \$40,000 qoyskii dhan afar qof
- Ugu yaraan guriga uu u joogo hal arday dugsi xanaano "Pre-K" ilaa fasalka 12, oo
- Ay la-kulmeen lumitaan dakhli xooggan oo kaga yimid COVID-19.

GANACSATADA YARYAR

\$2.25 MILYAN

Sanduuqa Buundada Saint Paul ee Ganacsatada Yaryar waxay bixin doontaa \$7,500 oo ah gargaar toos ah xagga kharashyada ganacsiga, oo ay ku jirto aanse ku koobnayn:

- Bixitaanada kirada/daynta guryaha
- Dheefaha caafiaadka shaqaalaha
- Bixinta fasaxyada iyo mushaharka
- Bixinno sahay-keene

Ganacsiyada oo qalmaa waxay leeyihiin ilaa 20 shaqaale ah, waxay leeyihiin dakhli sannadle guud oo ah \$2 milyan ama kayar, oo ka hawlgala gudaha Saint Paul ugu yaraan lix bilood, oo muujiyey dakhli saamyn xoog leh kaga timid COVID-19 nooca ganacsigooda.

\$3.25 MILYAN WADARTA MAALGELINEED

Sanduuqa Buundada Saint Paul waxa taageeray sanduuqyada Saint Paul Housing and Redevelopment Authority, iyo taageero ka timid Saint Paul & Minnesota Foundation and Ecolab Foundation. In dheeraad ka ogow wixii laxiriira Sanduuqa Buundada Saint Paul adiga oo ku biiraya Lasocodka COVID-19 ee Magaalada Saint Paul's COVID-19 goobta stpaul.gov/coronavirus

